San Diego City Schools
Fact Sheet
Xilliga Jiilaalka 2004

Habka caydhiska ardeyda oo kooban

Caydhintu waxaa weeyaan“ marka ardeyga gacanta ku haynta maamulka shaqaalaha dugsiga laga saaro. Ardeyda dugsiga laga caydhiyo kama qeybgeli doono barnaamijyada ama dhacdo kasta oo ay degmadu qabaneyso, waxaana ka mid ah barnaamijka waxbarashadda madaxa bannaan.” Ardeyga laguma talin karo in dugsiga laga caydhiyo ilaa la ogaado in ardeygu hal ama in ka badan uu ku xadgudbey waxyaabaha sababaya in dugsiga laga joojiyo ama laga caydhiyo ee Nidaamka Maamulka ee tirsigiisu yahay 6295 kuna saabsan caydhiska ardeyda ee degmada u dejisan. Warbixin ku saabsan nidaamkaas waxaa laga heli karaa dugsiga ilmahaagu dhigto ama shabakada Internetka ee degmada oo ah www.sandi.net/policy/.

Kedib marka guddiga maamulka ee la magacaabey ay talo-bixintooda soo jeediyaan ayey Guddiga Waxbarashaddu amar ku bixineyaan in ardeyga dugsiga laga caydhiyo, taas oo ku salleysan marka ay ogaadaan in ardeygu uu sameeyey falal sababeya in dugsiga laga caydhiyo.

Marka maamulaha ama qofka kale ee dugsiga loo magacaabey uu go’aansado in ardey uu gef lagu caydhin karo sameeyey, waxaa ardeygaasu xaq u leeyahay in go’aankaas maxkamad la geeyo muddo (30) maalmood oo maalmaha dugsiga la dhigto gudahood ah.

Ardeygu wuxuu xaq u leeyahay inuu hal mar dib u dhigto dhegeysiga maxkamada ee arrinta caydhinta ku saabsan. Mar haddii la bilaabo dhageysiga maxkamada, waa in la sii wadaa oo aan dib loogu dhigin arrimo aan muhim ahayn darteed.

Waa in ardeyga qoraal lagu ogeysiineyo dhageysiga maxkamada oo loo soo diraa (10) maalmood ka hor taariikhda maxkamadu dhacayso. Ogeysiintaas waa in lagu sheegaa:

- Taariikhda iyo goobta maxkamadu ka dhacayso.
- Xaqiiqooyinka gaarka ah iyo dembiyada caydhintaasi ay ku salleysan tahay.
- Nuqul ka mid ah sharciyada anshaxa ee degmada oo la xidhiidha dembigaas dhacay.
- Fursada uu ardeygu ama waalidka ama qofka ardeyga ka masuulka uu maxkamada ku imaneyo shakhsi ahaan ama inay qareen ama garyeqaan metela qabsadaan.
- Inay xaq u leeyihiin inay baadhaan, isla mar ahaantaasna, la siiyo nuqulo ku saabsan dhammaan dikomentiga loo adeegsan doono dhageysiga maxkamada.
- Fursada ay u leeyihiin inay horyimaadaan, wixii su’aalo ah ee ay qabaana weydiiyaan dhammaan markhaatiyada ka marag-kacaya dhageysiga maxkamada iyo inay su’aalo ka soo jeedin karaan ku saabsan dhammaan caddeymaha maxkamada la soo hordhigay.
- Fursad loo leeyahay in caddeymo ardeyga lagu taageerayo la soo bandhigo, waxaana ka mid ah markhaatiyaal.

Guddiga Baadha Eriska ardeyda waxay ka kooban yihiin ugu yaraan saddex shaqaalaha degmada ka mid ah oo uusan midna ka shaqeynin dugsiga ardeygu dhigto, iyaga ayaa dhageysiga maxkamada qaadeya oo eegaya in ardeyga dugsiga laga caydhiyo iyo in kale. Dhageysiga maxkamadaasu dadweynaha albaabku wuu ka xidhan yahay oo looma oggola inay soo galaan, haddii waalidka ama qofka ardeyga ka masuulka ah aysan codsi qoraal ah u soo gudbin oo ay ku dalbaneyaan in dadweynaha loo oggolaado dhageysiga maxkamadaas. Dhageysiga maxkamadaas cajalado ayaa lagu duubeyaa, ardeyguna qoraalada la soo hordhigey guddiga wuu heli karaa.

OO KOOBAN

- **Ardeyga laguma talin karo in dugsiga laga caydhiyo ilaa la ogaado in ardeygu hal ama in ka badan uu ku xad gudbey waxyaabaha sababaya in dugsiga laga joojiyo ama laga caydhiyo ee Nidaamka Maamulka ee tirsigoodu yahay 6295.**
- **Ardeygu wuxuu xaq u leeyahay in muddo 30 maalmood gudahood ah dhageysi maxkamadeed lagu sameeyo demiyada lagu soo oogey, waana in qoraal lagu ogeysiineyo dhageysiga maxkamadaas loo soo diraa.**
- **Guddiga Baadha Eriska ardeyda wuxuu ka kooban yahay ugu yaraan saddex qof oo shaqaalaha degmada ka mid ah.**
- **Dhageysiga maxkamada dadweynaha albaabku wuu ka xidhan yahay. Ardeygu dhammaan qoraalada kiiskiisa dhageysiga maxkamada wuu heli karaa.**
- **Guddigu waxay talo-bixintooda ku saabsan in ardeyga la caydhiyo iyo in kale u soo gudbineyaan Guddiga Waxbarashadda. Guddiga Waxbarashadda oo keliya ayaa ardeyga caydhin kara.**
- **Guddiga Waxbarashaddu waxay go’aan ku gaadhi karaan inaan ardeyga la caydhin, in la caydhiyo ama ardeyga caydhiska laga joojiyo, waana inay ugu taliyaan qorshe lagu baxnaanineyo (la-talin, adeega bulshadda, shaqo, iwm.).**
- **Marka ardey dugsiga laga eryo, waxaa ardeyga iyo waalidka ama qofka ardeyga masuulka ka ah lala socodsin doonaa wakhtiga iyo habka dugsiga dib loogu oggolaaneyo.**
- **Caydhinta ardeyda dugsiga laga caydhiyey wey dhaqan gashan tahay ilaa ay Guddiga Waxbarashaddu dib ugu oggolaadaan inuu dugsiga ku soo laabto.**

SOMALI VERSION: SUMMARY OF THE EXPLUSION PROCESS 2004

- Wey socotaa -

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

“Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah.”

San Diego City Schools

Fact Sheet

Guddiga Baadha Eriska ardeyda waa inay go'aan ku saabsan ku talo-bixiyaan in ardeyda la caydhiyo iyo in kale una soo gudbiyaan Guddiga Waxbarashadda.

Haddii Guddiga Baadha Eriska ardeydu ay go'aan ku gaadhaan inaan ardeyga la eryin, habkii caydhinta ku saabsanaa halkaas ayuu ku dhammaaneyaa. Ardeyga si dakhso ah ayaa dugsiga inuu ku noqdo loogu oggolaaneyaa. Waxaa uu ardeygu galeyaa barnaamijka waxbarashadda fasalka, barnaamij kale oo waxbarasho ah, barnaamij lagu baxnaanineyo ama isku darka labada barnaamijba. Go'aanka ay ku soo gaadhaan inaan ardeyga la caydhin waa mid kama dambeys ah.

Haddii Guddiga Baadha Eriska ardeyda uu ku talo-bixiyo in ardey la eryo, waa inay caddeymo arrintaas taageeraya u soo gudbiyaan Guddiga Waxbarashdda. Guddiga Waxbarashadda oo keliya ayaa ardeyga caydhin kara.

Marka ardey dugsiga laga caydhiyo, Guddiga Waxbarashaddu waa inay ku talo-bixiyaan qorshe ardeyga lagu baxnaanineyo. Qorshahaas baxnaaninta ardeyga waxaa ka mid ah dib u eegista iyo qiimeynta arjiga wakhtiga dib dugsiga loogu oggolaaneyo. Qorshaha waxaa kaloo ka mid ah ku talo-bixinta la-talinta, shaqada, adeega bulshadda iyo barnamijyo kale.Guddiga Waxbarashaddu marka ay isku raacaan in ardeyga dugsiga la eryo, waxay ardeyga ku qori karaan dugsi, fasal ama barnaamij ay isleeyihiin baxnaanada ardeyga wey u ku habboon tahay. Guddigu waxay kaloo go'aan ku gaadhi karaan inay joojiyaan caydhiska ardeyga dugsiga laga caydhineyo.

Marka uu dhammaado xilli-dugsiyeedka ama semisterka caydhinta ardeygu ay ku ekeyd, ardeygu waa inuu la xidhiidhaa Xafiiska Meeleynta iyo Racfaanka. Xafiiskaas oo go'aanka gaadhi doona meesha ugu habbon ee ardeyga lagu meeleynayo marka dugsiga inuu ku soo laabto loo oggolaado. Go'aankaasu wuxuu qaddarin doonaa nooca demiga caydhinta keentay iyo caafimaadka, badbaadada iyo daryeelka dhammaan shaqaalaha degmada iyo ardeyda.

Caydhinta ardeyda dugsiga laga caydhiyey wey dhaqan gashan tahay ilaa ay Guddiga Waxbarashaddu dib u oggolaadaan inuu ardeygu dugsiga ku soo laabto.

Marka ardeygu uu soo dhammeysto habka dugsiga dib loogu oggolaaneyo, Guddiga Waxbarashaddu waxay ardeyga u oggolaaneyaan inuu dugsiga ku laabto, ilaa la arko in uusan ardeygu buuxin waxyaabihii looga baahnaa qorshihii baxnaaninta ama uu muujiyo inuu nabadgelyada dugsiga, ardeyda kale iyo shaqaalaha degmada khatar ku yahay. Guddiga Waxbarashaddu marka ay ardey dugsiga ka caydhiyaan , waxay ardeyga iyo waalidka ama qofka ardeyga masuulka ah siin doonaan sharaxaad ku saabsan habka inuu dugsiga dib ugu soo noqdo loogu oggolaaneyo.

Haddii Guddiga Waxbarashaddu ardey la caydhiyey ay u diidaan in dugsiga dib loogu oggolaado, waa inay Guddigu laba mid go'aan ku gaadhaan, inay ku qoraan barnaamijyadii kale ee markii ardeyda la eryey la soo jeediyey in lagu qoro iyo in ardeyga lagu qoro barnaamijyada ardeyda dugsiyada laga eryey u adeegta. Taas waxaa ka mid noqon karta dugsiyada gobolka ee jaaliyada loogu talagalay. Guddigu Waxbarashaddu waa inay warqad qoraal ah ku ogeysiiyaan ardeyga iyo waalidka ama qofka ardeyga ka masuulka ah sababaha ay ardeyga ugu diideen inuu barnaamijyada dugsiyada caadiga ah ee degmada galo.

Marka uu ardeygu hawlihii loo xil saarey ee baxnaaninta si wanaagsan uga soo baxo, Guddiga Waxbarashaddu ardeyda dib ayey dugsiga ugu oggolaan doonaan.

SOMALI VERSION: SUMMARY OF THE EXPULSION PROCESS 2004

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation

Warbixinta kala Xidhiidh: Xafiiska Meeleynta iyo Racfaanka (619) 725-5660
Su'aalaha Warbaahinta (619) 725-5578 **www.sandi.net**

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.